MINNESOTA

*Sebtember 2019*

# Fahmka “Xeerka Ku-dalicidda Dadweynaha” Federaalka

*Xeerka la sii baahiyay ayaa dhaqangalaya Oktoobar 15, 2019*

Waaxda Amniga Dalka ee Maraykanka (The U.S. Department of Homeland Security) ayaa dhawaan go'aamisay sharci fududayn doona in la diido codsiga soohaajirku inuu soo galo Mareykanka, ama u helo fiisa, ama uu beddelo xaaladdiisa socdaalka (tusaale, helidda Kaarka Cagaaran) iyada oo la cusakanayo sababaha inay u badan doonto inay "hoos yimaadddiin mas'uuliyadda dawladda." Xeerka ayaa dhici karta inuu ku baahiyo cabsi iyo jahwareer jaaliyadaha soohaajirayaasha ah ee raba inay helaan kaalmada dawladda. Waxay walibana ku dhalisay su'aalo shaqaalaha degaanka iyo adeeg bixiyeyaasha kale ee maamula dheefaha. Dukumintigani wuxuu ka hadlayaa su'aalaha badnaa la weyddiiyo ee la xiriira xeerka oo wuxuuna bixinayaa macluumaad ku saabsan dhawritaanka asturnaanta xogta dadka ka qoran barnaamijyada dheefaha dawladdu ay bixiso.

## Waa maxay “hoos imaadka mas'uuliyadda dawladdu?”

Haddii u soohaajire codsado inuu soogalo Mareykanka, ama u helo fiisa, ama inuu beddelo xaaladdiisa socdaalka, saraakiisha socdaalka ayaa go'aamin doona haddii codsaduhu laga yaabo inuu istcimaalo dheefaha dawladda qaarkood. Waqtigan xaadirka ah, isticmaalka barnaamijyada gargaarka lacagta kaashka ah (sida Dakhliga Haqabeelka Dhaqaale Kaab Ah ama Gargaarka Ku Meel-Gaarka ah ee Qoysaska Baahan) iyo daryeelka muddada-dheer ah ee ay dawladdu-lacagta-bixiso waxay u arki karaan inuu qofka 'hoos yimaaddo mas'uuliyadda dawladda" oo taasina u horseedi doonto in codsiga la diido.

## Muxuu sharcigu beddelayaa?

Sharciga cusub ee Waaxda Amniga Dawladda ayaa fidinaysa liiska dheefaha loo tixgelin doono inta lagu jiro go'aaminta hoos imaadka mas'uuliyadda dawladda. **Intaa waxa u dheer lacaga kaashaka ah iyo daryeelka muddada dheer ee ay dawladdu lacagta bixisor, iyada dheefaha soo socda sidoo kale la tixgelin doono:**

- **Qaar ka mid ah dheefaha Gargaarka Caafimaadka ee aan xaaladaha degdegga ahayn (Medicaid)**
- **Dheefaha Barnaamijka Taageerada Kaabka ee Nafaqada (SNAP)**
- **Dheefaha Guriyaynta qaarkood** (oo ay ku jirto gargaarka Barnaamijka Foojarka Xulashooyinka Guriyaynta Section 8, Ka gargaarka Kirada Guriyaynta Ku-Yaal Guryo Mashruuca Section 8 iyo Guriyaynta Dawladda,

Markay hoos timaad sharciga cusub, saraakiisha laanta socdaalka waxay tixgelin doona xaddiga dheefaha ee u qofka soohaajiray u isticmaalay, muddada ay u isticmaaleen, iyo qodobbo kale sida da'da, dakhliga, waxbarashada, iyo xaaladda caafimaadka.

## Goorma ayuu xeerku dhaqangalayaa?

Sharciga ayaa loo qorsheeyay in uu dhaqangalo Oktoobar 15, 2019. Hase yeeshe, Minnesota ayaa ku biirtay dacwad dawlado gobol badan ka kaboon leh oo ay u badan thay inay daahiyaan dhaqangalkeeda. **Waa muhiim in la ogaado inuuna qabanayn wixii horay u soo dhacay, sidaa darteed, isticmaalkii wixii kasta ee ahaa Gargaar Caafimaad, SNAP, iyo dheefaha guriyaynta kahor Oktoobar 15, 2019 looma xisaabin doono codsadaha.**

## Maxaa dhacaya haddii xubnaha qoysku ay helaan dheefaha?

Xeerkan markay hoos imaad, **kaliya dheefaha uu helo shaqsiga codsanaya u oggolaanta imaanshaha Mareykanka ama raba beddelka heerka socdaalka ayaa loo tixgelin doonaa**. Dheefaha ay heleen xubnaha kale ee qoysku, sida carruurta muwaaddin ah, codsadaha looguma tirinayo.

## Soohaajirayaashee ayuuna xeerku saamayn doonin?

Xeerku ma khuseeyo soohaajiryaasha soosocda:

- Deganaanshaha joogtada ah ee sharciga leh ee codsada inay noqdaan muwaaddin Mareykan ah ama dib u cusbooneysiinaya Kaararkooda Cagaaran
- Dadka qaxootiga ah, magangelyo ku jireenka, soohaajirayaasha ka yimaad dalalka qaarkood, dhibbanyaasha waxyeello ka soo gaartay ka-ganacsiga dadka, dhibanayaasha qaarkood ee fal dambiyeed ku dhacay, dhallinta aan qaan gaarin ee ah soohaajirayaasha khaaska ah, shakhsiyaadka codsanaya ama dib u cusbooneysiinaya Heerka Badbaadinta Ku-meelgaarka ah (TPS), iyo kooxaha kale ee "bina-aadamnimada" loo tixgaliyo
- In kasta oo dadka aan muwaaddiniinta ahayn ee ka tirsan ciidamada qalabka sida ee Mareykanka, ee ku jira howlo gudasho haatan, ama u adeega qayb ka mid ah qeybaha Kaydka Heeganka ah (Ready Reserve) ayaa iyaguna walibana hoos imanaya go'aamin la beddelay oo ah xeerka hoos imaadka mas'uuliyadda dawladda, isticmaalkooda (ama istcimaalkaqoyskooda) dheefaha ayaa loo tixgalin doonin.

## Kuwee dheefaha dawladda ah ee aan loo tixgalin doonin hoosta xeerkan?

**Daryeelka Caafimaadka:**

- Gargaarka Caafimaadka ay marinka u heleen soohaajiryaasha ka yar da'da 21 iyo haweenka uurka leh
- Qaar ka mid ah dheefaha Gargaarka Caafimaadka xaaldaha degdegg ah
- Dheefaha Gargaarka Caafimaadka qaarkood ee dugsiga salka ku haya.
- Dheefaha Gargaarka Caafimaadka ee hoos yimaad Sharciga Waxbarashada Dadka Naafada ah (IDEA)
- Gargaarka Caafimaadka loogu talagalay carruurta muwaaddininmada sugeysa ee ugu dhalatay dalalka shisheeyaha muwaaddiniinta Mareykanka
- MinnesotaCare
- Cashuur ugu naqidda qaddinka bixin-bileedka iyo cashuur ugu naqidda bixin-bileedka (tusaale, dhaqaale kaabitaannada loogu talagalay qorshayaasha caafimaadka shirkadaha gaarka loo leeyahay ee loo maro MNsure)[1]

**Nafaqada:**

- Barnaamijka Kaabka Nafaqada ee Khaaska ah looguna talagalay Haweenka, Dhallaanka, iyo Carruurta (WIC )
- Xeerka Qadada Dugsiga ee Richard B. Russell, oo ay ku jiraan Seamless Summer Option (Quudinta Carruurta ee Xagaaga), Afterschool Meal Supplement (Quudinta Dheeraadka ah ee ah waxa Dugsiga Ka Dambeeya), Barnaamijka Gaarka ah ee Caanaha, Barnaamijka Cuntada ee Daryeelka Ilmaha iyo Qaangaaraha iyo Barnaamijka Furuutka iyo Khudaarka ee Darayga ah.

**Xannaanada Carruurta (Childcare):**

- Head Start (Horay-u-Siinta Carruurta Fursado Waxbarasho)

[1] Cashuur ugu naqidda qaddinka bixin-bileedka iyo cashuur ugu naqidda bixin-bileedka looma tixgelin doono inay yihiin dheef dawladeed markay hoos timaad xeerka. Hase yeeshe, qof kasta oo codsanaya kaalmada dhaqaale ee loo maro MNsure ayaa marka hore la marin doonaa qiimaynta uqalmidda Medicaid. Qiimayntan uqalmidda noocan oo kale ah ayaa dhici karta in loo baahdo in looga warbixiyo ama loo sharraxo saraakiisha socdaalka.

- Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Ilmaha (CCAP)

**Guriyaynta:**

- Ugu Naqidda Cashuurta Guriyaynta Dadka Dakhliga-Hooseeya
- Barnaamija Ka Gargaarka Tamarta Guriga Dadka Dakhliga-Hooseeya Leh (LIHEAP)
- Qaybta 515 guriyaynta miyiga
- Qaybta 514/516 guriyaynta xoogsatada beeraha
- Isticmaalka gabbaadyada hoy-la'aanta
- Barnaamijyada hoy-la'aanimada Gobolka iyo Federaalka
- Gargaarka guriyeynta gobolka iyo barnaamijyada kabista dhaqaalaha
- Branaamijyada Gargaarka Guriyeynta iyo dhaqaale kaabka federaalka ee aan ahayn kuwa ku liis garaysan qeexitaannada dheefaha dawladda ee ku yaal korka.

**Dheefaha Naafanimada:**

- Caymiska Naafanimada Sooshal Sekuritiga (Haqbeelka Bulshada) (SSDI)

**Xuquuqda Aadanaha:**

- Xeerka hoos imaadka mas'uuliyadda dawladda ayaan beddeli doonin midkoodna adeegyada ay bixiso Waaxda Xuquuqda Aadanaha ee Minnesota.

**Tacliinta Sare:**

- Deeqda Barnaamijka Federaalka ee Pell Grant ee loogu talagalay ardayda waxbarshada ka damabaysa dugsiga sare.

## Sharciyada gobolka iyo federaalka ayaa dhawra xogta dadka qaata dheefaha dawladda.

Macluumaadka ku saabsan codsadayaasha iyo ka-faa'iideystayaasha ayaa kaliya loo isticmaali karaa oo keliya maamulitaanka dheefaha looma wadaagi karo fulinta sharciyada socdaalka. **Shaqaalaha gobolka, kaawntiga, iyo kuwa qabaa'ilka ayaa ah inaysan la wadaagin macluumaadka ku saabsan xaaladda socdaalka (immigration) shakhsiga ama isticmaalka dheefaha. Haddii aad heshay weyddiisi ah inaad sidaas samayso, fadlan la xiriir kormeerahaaga.**

## Sideen wax uga qaban karaa su'aalaha iyo waxyaabo tebashada?

Haddii qof aad u adeegto uu su'aalo ka qabo sida uu xeerkani saamayn ugu yeelan karo xaaladda socdaalka ama dheefaha, waxay kala xiriiri karaan xafiiska Caawimaada Sharciga (Legal Aid ) telefoonka 1-800-292-4150 laga bilaabo 8:30 subaxnimo illaa 4:30 galabnimo, Isniinta - Jimcaha (www.lawhelpmn.org) ama qareen socdaal.

Si aad u hesho qaabab la istcimaali karo oo ah macluumaadkan ama ka caawimaad ah marinkale oo ah u sinnaanta adeegyada bulshada, u qor DHS.info@state.mn.us, wac 651-431-2911, isticmaal adeegga gudbinta aad doorbidayso. ADA1 (1-18)

Macluumaadka ku jira dukumintigan waxa soo uruuriyay Golaha Dadka Reer Minnesota ee Hiddaha Afrika Ka Soojeeda, Golaha Dadka Reer Minnesota ee Aaasiyaan Baasafik, MNsure, Golaha Minnesota ee Arrimaha Dadka Latiinka ah, Waaxda Waxbarashada Minnesota, Waaxda Caafimaadka Minnesota, Waaxda Xuquuqda Aadanaha ee Minnesota, Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota, Wakaaladda Maaliyadda Guriyaynta Minnesota, iyo Xafiiska Tacliinta Sare ee Minnesota. Waxyaabaha ku qoran xaashidan ee ah Su'aalaha Badanaa La Weyddiiyo(FAQ) waxay la mid yihiin waxyaabaha ay ka kooban yihiin Su'aalaha (FAQ) mas'uuliyadda dawladda ee ay qaybiyaan midkoodna ha nqodaane ha'yadahan gobolku.